

## **Muddada u dhexaysa tallaalka koowaad iyo midka labaad oo la dheeraynayo**

**Muddada u dhexaysa qaadashada tallaalka koowaad iyo midka labaad ee tallaallada mRNA (Pfizer-BioNTech iyo Moderna) ee dadka ka yar 65 sano, ayaa la kordhinayaa oo laga dhigayaa ilaa iyo 12 toddobaad. Waxaa sidaas ku taliyay Machadka caafimaadka dadweynaha, waxayna khuseysaa keliya dadka aan cudurro kale qabin. Dadka ay da'doodu u dhexayso 18 ilaa 44 sano waxaa, sida ay sheegayso qiyaasta ku meelgaarka ah ee FHI, intii markii hore la filayay tallaalka looga soo hormarin doonaa ilaa iyo shan toddobaad.**

Taladu waxay dhaqangelaysaa laga billaabo 3-da maajo, laakiin ballamihii hore loo qabtay waxba kama beddelayso. Taas oo loola jeedo in dadka qaatay tallaalkii koowaad, kii labaad na ballantiisa loo qabtay – ballanta way haysanayaan. Markaas waxaa labada tallaal u dhexaynaysa lix toddobaad.

– Maanta ayay na soo gaartay talada Machadka caafimaadka dadweynaha, waxaan go'aansannay in aan talada qaadanno. Marka aan dheerayno muddada labada tallaal u dhexaysa, dad badan ayaa tallaalka helaya wakhti intii hore ka horreeya. Taas oo ka hor tageysa xannuun halis ah iyo geeri labadaba, iyo in uu cudurka ku yaraado bulshada dhexdeeda, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Aqoonta cusub ee loo leeyahay waxtarka tallaallada mRNA, ayaa sheegaysa in uu aad u yar yahay farqiga u dhexeeya heerka maaddada difaaca jirka lix ilaa 12 toddobaad. Taas oo la mid ah in ay tallaaladani cudurka si fiican u difaacaan 12 toddobaad tallaalka koowaad kaddib.

– Waa muhiim in tallaalka labaad wakhtigiisa la qaato si loo gaaro tallaalis buuxda, ayuu hoosta ka xarriiqay Høie.

Dadka ay da'doodu u dhexayso 18 ilaa 44 sano waxaa, sida ay sheegayso qiyaasta ku meelgaarka ah ee FHI, inta saadaasha maanta sheegayso tallaalka looga soo hormarin doonaa ilaa iyo shan toddobaad.

Waxaa la tallaalayaa toddobaadka 29 (19. – 25. luuliyo) meeshi la tallaali lahaa toddobaadka 34 (23. – 29. ogoosto).

10-ka maajo marka la soo bandhigo warbixinta guddiga Vorland kaddib haddii Norway laga billaabo qaadashada tallaallada AstraZeneca iyo Janssen, waxay taasi sii dedejin doontaa xawaaraha dadka lagu tallaalayo.